

Barnaamijka Carruurta Ka Xorta ah Sunta SIYAABAHA AY KU SOO GAARI KARAAN KIIMIKOOYINKA AY SUURTAGALKA TAHAY IN AY LEEYIHIIN WAXYEELEEYO



Soo gaarista Maqaarka (dubka)

Qaar ka mid ah alaabta daryeelka shakhsiyeed iyo waxyaalaha la isku qurxiyo ayaa waxaa ku jira phthalates iyo biro u horseedi kara in ay maqaarka/dubka soo gaaraan.

Soo gaarista kiimikada

Soo gaarista kiimikadu waxay ka iman kartaa isticmaalka alaabada sida alaabta alwaax isku dhafka/macmalka ah, kaas oo laga yaabo inuu ku jiro formaldehyde oo laga helo xabagta iyo koolada.

Neefsashada (neefsashada)

Alaabta nadiifinta guriga waxaa laga yaabaa in ay ku jiraan phthalates, kuwaas oo loo isticmaalo carrafta udgoon.

Liqitaanka (cunista iyo cabbidda)

Kiimikooyinku waxay ka bixi kara alaabta guriga waxayna ku degi karaan boodhka/dhaska. Dhaqdhaqaaqa gacanta iyo afka ah awgeed carruurta waxay liqi karaan dhaska ay ku jiraan kiimikooyinkani.

Sida loo yareeyo soo gaarista kiimikooyinkan

- Gurigaaga faakuum ku nadiifi oo isticmaal maro qoyan si aad boodhka/daska uga nadiifiso meelaha dushooda. Kiimikooyinka ka yimid alaabooyinka qaarkood ayaa waxay ku degi karaan dhaska guriga.
- Ka hubi calaamadaynta (labels) alaabta si aad uga fogaato kiimikooyinka aad ka welwelsan tahay oo soo iibso badeecooyin lagu sameeyay kiimikooyin ammaan ah.
- Haddii ay suurtagal tahay, iska saar oo tuur alaabta guriga (masaasadaha duugoobay ee ilmaha, alaabta guriga, qalabka elektarooniga ah) ee la ogyahay in lagu sameeyey Kiimikooyinka Mudnaanta leh iyo Kiimikooyinka Welwelka Sare laga Qabo.

Baro wax badan oo ku saabsan Kiimikooyinka Mudnaanta leh iyo Kiimikooyinka Welwelka Sare laga Qabo

Iskaan garayso QR koodhka si aad wax badan uga ogaato barnaamijka iyo shaqada la qabanayo.



Toxic Free Kids Program

651-201-4899 | health.risk@state.mn.us
[www.health.mn.gov/communities/environment/
childenvhealth/tfka/index.html](http://www.health.mn.gov/communities/environment/childenvhealth/tfka/index.html)